

Information

Baaritaanka Papka: waa hab looga hortago kansarka afka ilmo-galeenka

Waa maxay kansarka afka ilmo-galeenka?


Kansarka afka ilmo-galeenku waa kasarka ilmo-galeenka. Afka ilmo-galeenku wuxuu ku yaal inta u dhaxaysa utiiraska iyo siilka.

Yaa u baahan baarista Papka?

Dhammaan haweenka da'dooda u dhaxayso 18 iyo 70 sano kuwaas oo la guursdey ama saaxiib yeeshay waxay u baahan yihiin inay sameeyaan baarista Papka labadii sano oo kasta.

Waa maxay baarista Papka?

Baarista Papka waa baaris sahlan oo lagu ogaado isbaddallada unugyada afka ilmo-galeenka kuwaas oo keeni kara kansarka afka ilmo-galeenka. Baarista Papka waxay qaadata dhowr daqiiqo oo keliya.



Qaadashada baarista Papkaway ku adkaan kartaa haweenka la soo gudey ama dhaqan ahaan la soo gooyey. Waxaa muhiim ah inaad u sheegto dhaqtarkaaga ama kalkaaliyahaaga haddii lagu soo gudey, ka hor intaan lagaa qaadin baaristaada Papka si ay ula socdaan baadidaada.

Baarista Papka waxa loo qaataa sidaan soo socota:

- Dhaqtarka ama kalkaaliyaha ayaa samayn doona baarista. Waxaad u baahan tahay inaad dharka ka bannayso dhexdaada ilaa hoos aadna u seexato dhabarka ama dhinac.
- Dhaqtarka ama kalkaaliyaha ayaa aalad loo yaqaan speculum gelin doona siilka. Speculumku wuxuu furaa siilka si afka ilmo-galeenka loogu arko si waadax ah.
- Baarista xanuun ma leh hase ahaatee xoogaa waa raaxo darro. Haddii baarista Papka ku dhaawacdo, u sheeg dhaqtarka ama kalkaaliyaha isla markiiba.
- Dhaqtarka ama kalkaaliyaha ayaa ka qaadi doona sambal unugyada afka ilmo-galeenka ayagoo adeegsanaya qaado yar ama buraash waxayna dulsaaraan muraayad sibibixanaysa.



Natiijooyinka waxaa badanaa la helaa muddo laba asbuuc ah. Kala hadal dhaqtarkaaga ama kalkaaliyahaaga haddii aad qabto wax su'aalo ah ama dareeno ah oo ku saabsan baarista Papka.

Fadlan dhinaca kale urog

Baarista Papku: waa hab looga hortago kansarka afka ilmo-galeenka

Maxaa dhacaya haddii natiijooyinkaygu aysan caadi ahayn?

Haddii natiijooyinkaagu aysan caadi ahayn, taasi macnaheedu maahan inaad kansar qabto. 10kii hal natiijooyinka baaris Pap ayaa leh isbaddalo aan caadi ahayn. Badiba isbaddalladan waa infagshano yaryar kuwaas oo si dhib yar loo daaweyn karo ama ayagaa iskood iska baaba'a. Haddii aad qabto isbaddalo aan caadiga ahayn, dhaqtarkaaga ayaa kaala hadli doona waxyaalo ku saabsan daaweynta ugu fiican. Tana waxaa ka mid ah baarisyo Pap oo joogto ah.



Waa maxay sababta loo sameeyaa labadii sano oo kasta?

Badiba xaaladaha kansarka afka ilmo-galeenka waxay qaadataa ilaa 10 sano inay samaysanto. Qaadashada baarista Papka labadii sanoba mar waxay xaqiijinaysaa in haddii wax isbaddal ah ay dhacaan, in la daaweyn karo ka hor intaysan noqon kansar.

Halkee baad ku qaadan kartaa baarista Papka?

Waxaad ku qaadan kartaa:

- goobta caafimaadka (GP ama dhaqtarka)
- xarunta caafimaadka bulshada
- kilinikada qorshaynta qoyska
- xarunta caafimaadka galmada.

Well Women's Clinic ee Royal Women's Hospital wuxuu ku taqasusay baarista Papka ee haweenka kuwaas oo la soo gudey. Waxaad wici kartaa oo ballan ka samaysan kartaa taleefanka ah (03) 8345 3037

Markii aad samaynayso ballanta, waxaad weydiin kartaa inaad aragto dhaqtar ama kalkaaliye dumar ah. Haddii aad qabto baahiyo kale oo gaar ah sida ballamo muddo dheer ama turjumaan, fadlan u sheeg inay ogaadaan isla markaas. Waxaad kaloo usoo qaadan kartaa liiska su'aalaha ballantaada si aad ugala hadasho dhaqtarka ama kalkaaliyaha ka hor intaadan qaadan baarista Papka.

Waxaad ka codsan kartaa qof qaraabo ama saaxiibkaa ah inuu kuu soo raaco ballanta. Faahfaahinta ballantaada iyo natiijooyinku waa kuwo qarsoodi ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baarista Papka ka eeg papscreen.org.au am aka wac Khadka Taleefanka Cancer Council taleefanka ah 13 11 20.

December 2013